

Dhammaan adeegyada dowladda iyo bulshada waa inay:

- ku dareensiyaan in lagu soo dhawaynayo
- xushmad kuula dhaqmaan
- kuula dhaqmaan si la mid ah dadka kale
- la socdaan dhaqamada kala duwan
- kaa caawiyaan inaad fahamto xuquuqdaada.

Waa laguu oggol yahay inaad ka dacwooto adeeg bixiye.

Ombudsman-ka (Dacwad Baaraha) NSW

Waxaan halkaan u joognaa inaan caawino qofkasta oo ku nool NSW.

Waxaan rabnaa in qof walba loola dhaqmo si cadaalad ah.

Adeeggeennu waa lacag la'aan.

Nala soo xiriir



Wac 02 9286 1000

Wicitaan bilaash ah 1800 451 524

oo ka baxsan aagga magaala weyntra Sydney
- waxaa laga yaabaa in lagugu soo dalaco
qarashka mobilada.



nswombo@ombo.nsw.gov.au



National Relay Service
(Adeegga gudbinta Qaranka) 133 677



Turjubaan

Tilaabada 1: Wac TIS 131 450

Talaabada 2: Weydii inaad lahadasho

Ombudsman-ka NSW - 9286 1000



www.ombo.nsw.gov.au

ISBN: 978-1-925885-73-6

Somali | Soomaali



**Dhibaato ma kaa haysataa
adeegga Dawladda NSW ama
adeegga bulshada?**

Waxaa laga yaabaa inaad isku dayday inaad sameyso cabasho. Laakiin taas kuma eysan caawin.



Ma u malaynaysaa in si aan caddaalad ahayn laguula dhaqmay?



Waxaad isku dayday inaad caawimaad hesho, laakiin waad kari weyday:

- Inaad xalliso dhibaatada
- hel maclumaaad dheeraad ah
- wax ka ogow xuquuqdaada.



Shaqaaluhu waxtar ma lahayn, ama iyaguba

- waxay ahaayeen kuwo edeb daran oo aan ku ixtiraamin
- Ma aysan haynin maclumaaad ku qoran luuqadaada
- ma lahayn turjubaan.

Ombudsman-ka (Dacwad Baaraha) NSW ayaa ku caawin kara.



Waan kaa caawin karnaa:

- inaan warqad u dirno adeeg bixiyaha
- heshid qofka saxda ah ee lala xiriiri karo
- sheegno natijjada aad ka rabto cabashadaada.



Waxaa laga yaabaa inaan:

- kaa codsano inaad keento wixii waraaqo ah ee aad ka hayso dhibaatada, sida waraaqaha aad u qortay adeeg bixiyaha ama waraaqaha uu adeeg-bixiyuhu kuu soo qoray
- la hadal adeeg bixiyaha aad dhibaatada ku qabtid
- la hadal dadka kale ee ku caawiyey.

Dadka kale waxaa laga yaabaa inay qabaan dhibaato la mid ah taada. Wuxaan la shaqeynaa adeeg bixiyeyaasha adeegyada loogu wanaajiyo qof walba.